

Asylum Support Partnership

help and advice



March 2012

Somali

Ma tahay qof sabool ah oo dhamestay habkii magangalyo-doonka?

Miyay Hay'adda Xuduudda ee UK (UK Border Agency - UKBA) diiday codsigaagii magangalyada? Ma dhacday inaanad ku guuleysan racfaanadii magangalyada? Haddii aad ku tiirsanayd ama aad ku noolayd taageero aad ka heli jirtay dawladda – Hay'adda Xuduudka ee UK (UKBA), waxa koley markaa dhacday in UKBA ay joojisay taageeradii ay ku siin jirtay. Marka magangalyo-doonku aanay lahayn xuquuq racfaan oo u hadhsan waxay UKBA ka soo qaadaa inay ahaan jireen magangalyo- doon balse aanay imminka ahayn.

Caadi ahaan, dawladdu waxay kaa filaysaa inaad si ikhtiyaar ah uga tagtid Boqortooyada Midowday (UK), ama waxay soo diyaarin doonaan sidii lagu saari lahaa. Haddii UKBA aanay isla markiiba kaa saari karin Boqortooyada Midowday (UK), waxa dhici karta inaad noqoto qof aan haysan hoy iyo taageero dhaqaale.

Haddii ay arrintu sidaa tahay, waxa dhici karta inay suurogal kuu noqoto inaad ka codsatid UKBA qadar ah taageero kooban oo loo yaqaano 'taageerada Qaybta 4-aad' (Section 4 support). Taageeradani waxa guud ahaan loogu talagalay magangalyo-doonkii hore ee aan lahayn caruur. Magangalyo-doonka leh caruur ka yar da'da 18 jir waxa u sii socon doona taageerada ilaa ay ka baxayaan Boqortooyada Midowday (UK).

Waa Maxay Taageerada Qaybta 4-aad?

Haddii ay kuu banaan tahay Taageerada Qaybta 4-aad, waxay UKBA markaa ku siin doontaa hoy aad adigu adeeganaysid iyo kaadhka 'Azure' loogu talagalay cuntadaada iyo alaabaha aasaasiga ah sida alaabta nadaafadda. Laguma siin doono wax lacag (kaash) ah. Taageeradaada todobaadlaha ah ee £35.39 qofkiibaa todobaadkii waxa lugu shubi doonaa kaadhka lacag-bixinta. Kaadhka Azure waxa lagu isticmaali karaa dukaamada qaarkood sida Asda iyo Tesco, si aad u iibsatid alaabooyinka aasaasiga ah, sida cunto, alaabta nadaafadda, alaabta nadiifinta. Si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan kaadhka lacag-bixinta ee Azure ka fiiri qoraalka la yidhaahdo 'Section 4 support Azure payment card' oo laga helo: <http://languages.refugeecouncil.org.uk/english/summary.htm#26>

Waxay u badan tahay in hoy lagaa siiyo meel ka baxsan Landhan (London). Waxa fursadda hoyga lagu soo jeedin doonaa kaliya hal mar isla markaana haddii aad diidid fursadaas si kasta ha ahaato sababtu, waxa dhici karta in UKBA kaa joojiso taageerada. Kaliya marka ay jiraan xaalado gaar ah, ayaa magangalyo-doonka helay taageerada Qaybta 4-aad la geyn doonaa meel u sii dhow xubnaha qoyskooda. Waxay u badan tahay in aad hoy la wadaagi doontid dad kale. Haddii ay jiraan xaalado gaar ah oo keenaya inaanay kugu haboonayn wadaagistu, waa in sababaha qoraal ahaan loogu soo gudbiyaa UKBA.

Maxay yihiin shuruudda taageerada Qaybta 4-aad?

Waxa UKBA u yaalla shuruud adag oo go'aan lagaga gaadho in lagu siiyo taageerada Qaybta 4-aad iyo in kale. Shuruudahaa waxa ugu horeeya inaad u muuqatid ama aad tahay baahane mudo 14 bari gudahood. tani macnaheedu waxaa weeye in adiga iyo qofka kugu tiirsanba haysan hoy ku filan ama wax kasta oo lagu gaari karo, iyo/ama aadan helaynin baahida noolasha aasaasiga ah sida cuno soo iibsasho. Waa inaad sharaxdid sida aad isku taageeri jirtay ilaa imminka waxana lagaa rabi doonaa inaad keentid wax xaqiijin oo aad taa ku muujinaysid.

Qoraalo kale ayaa laga heli karaa bartan <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Asylum Support Partnership is a partnership project hosted by the British Refugee Council
British Refugee Council, (commonly called the Refugee Council) is a company limited by guarantee registered in England and Wales, [No 2727514] and a registered charity, [No 1014576].



Waxa kale oo lagaa rabaa inaad muujisid inaad ka soo baxaysid ugu yaraan **mid** ka mid ah shuruudahan soo socda:

1. Waa inaad ku jirtid qaadista talaabooyin aad kaga baxaysid Boqortooyada Midowday (UK), ama waa inaad isu diyaarinaysid sida aad taas u sameyn lahayd.
2. Ama ma awoodid inaad ka baxdid Boqortooyada Midowday (UK) sababta oo ah caqabad jidheed oo kuu diidaysa inaad u safartid wadankaaga, tusaale ahaan cudur ama uur dabayaaqo ah.
3. Ama waxa aad codsatay oo lagu oggalaaday inaad Maxkamadda Sare (High Court) u tagtid dib-u-fiirin maxkamadeed si aad uga doodid diidmada ay UKBA ku diiday codsigaaga magangalyo. U fiirso in gudaha Iskotlaan, kaliya aad u baahan tahay inaad muujisid inaad codsatay dib-u-fiirin maxkamadeed. Waxa kale oo laga yaabaa inaad codsi kale oo aan go'aan laga gaadhin kuu yaalo UKBA sida codsi magangalyo oo cusub.
4. Ama ma awoodid inaad safartid sababta oo ah ma jiro jid amaan ah oo aad ku noqon kartid. Sida ay sheegtay UKBA, xilligan ma jiro wadan lagu dabiqi karo doodan. Wakiilkaaga sharci ama la-taliya Adeegga Wax Kasta Hal Meel (One Stop Service) ayaa awoodi kara inuu kuu sheego in taas is beddeshay iyo in kale.
5. Ama siinta hoy waxay lagama-maarmaan u tahay inaan lagu xadgudbin xuquuqdaada bini'aadan. Tusaale ahaan, haddii aad sameysatay codsi magangalyo oo cusub oo warka ku yaalaa codsiga uu ka duwan yahay codsigaagii hore, waa in lagu siiyo taageerada Qaybta 4-aad.

UKBA waxay codsi kasta u qiimeysa xaaladiisa gaarka ah marka la codsano taageerada Qaybta 4-aad waxana ay kaa codsan doontaa inaad keentid marag-kac qoraal ah oo sheegaya sababta aanay suurogal kuugu ahayn inaad ku noqotid wadankaagii ama sababta aan safarku suurogal kuugu ahayn. Waxay taasi noqon kartaa warqad ka timi dhakhtar oo sheegaysa inaanad safar gali karin ama cadeyn qoraal ah oo sheegaysa inaad Maxkamadda Sare ka haysatid oggalaansho dib-u-fiirin maxkamadeed.

Sidee baan ku codsan karaa taageerada Qaybta 4-aad?

Waxaad codsan kartaa taageerada qaybta 4-aad adoo isticmaalaya Foomka Codsiga ASF1 ood ka heli kartid websaydka UKBA:

<http://www.ukba.homeoffice.gov.uk/asylum/support/apply/section4/>

La xidhiidh Adeegga Wax Kasta Hal Meel (One Stop Service) ee degmadaada waxana ay talo kaa siin doonaan foomka la isticmaalayo, waxa kale oo ay kaa gargaari doonaan buuxinta warqadda codsiga ee saxda ah. La-taliye ka socda Adeegga Wax Kasta Hal Meel (One Stop Service) ayaa warqadda codsigaaga u soo diri doona UKBA si ay uga fiirsadaan kuguna wargalin doona go'aanka. Waxa kale oo ay ku siin karaan war ku saabsan taageero kale oo aad u baahan kartid, tusaale ahaan kharashka safarka ee aad kaga tagaysid hoygaaga kuna tagaysid xarun iska-soo-warbixin. Si aad u heshid warka ku saabsan sidii aad u heli lahayd Adeegga Wax Kasta Hal Meel (One Stop Service) ka eeg dhamaadka qoraalkan yar.

Marka laga reebo Adeegga Wax Kasta Hal Meel (One Stop Service), wakiilkaaga sharciga, xarunta sharciga ee degmada, Xafiiska La-talinta Muwaadiniinta (Citizens Advice) ama hay'adda beesha qaxootiga ah ayaa laga yaabaa inay awoodaan inay kaa gargaaraan codsashada taageerada Qaybta 4-aad.

Fadlan u fiirso inaad u baahan tahay inaad codsatid taageerada Qaybta 4-aad isla wakhtiga aad UKBA ka heshid warqad kuu sheegaysa in la joojinayo taageeradii aad hore u qaadan jirtay.

Waxa aad u baahan tahay inaad saxeexdid foomka ama warqadda si aad u xaqiijisid inaad fahamtay qodobada iyo shuruudda lagu helo taageerada Qaybta 4-aad:

- Taageerada Qaybta 4-aad waxay ka kooban tahay hoy aasaasi ah.
- UKBA waxay caadi ahaan hoyga ka bixisaa dibadda Landhan, taasoo macnaheedu yahay inay dhici karto inaad guurtid haddii aanay jirin xaalado gaar ah oo sabab u noqonaya in hoy lagaa siiyo Landhan.
- UKBA waxay si joogto ah dib u eegi doontaa inay wali kuu banaan tahay qaadashada taageerada Qaybta 4-aad.
- Haddii lagu siiyo taageerada Qaybta 4-aad isla markaana uu maamulku si caqli-gal ah kaaga codsado inaad war siisid, waxa lagaa rabi doonaa inaad ka soo jawaabtid codsigooda.

- Waa inaad ogolaatid inaad sheegtid dhamaan macluumaadkaaga dhaqaale oo aad u idintid ogolaanshaha UKBA inay isticmaasho maclumaadka ay sameeyeen hay'ado kale ay ka mid tahay macluumaadka dhaqaale si loo hubiyo xaq loogana helo khaa'inimada.

Haddii codsigaaga aad ku guuleysatid, waxay UBKA qaadan doontaa dhawr maalmood si hoy laguugu soo helo, waxana ay kuu soo diri doonaan tigidh safar si aad ugu tagtid hoyga.

Mudo intee leeg ayaa la i siin doonaa taageerada Qaybta 4-aad?

Waxay UKBA si joogto ah dib u fiirin doontaa u-banaanaantaada Qaybta 4-aad. Waxay eegi doonaan in xaaladahaagu is beddeleen oo ay wali jiraan caqabado kaa horjoogsanaya inaad ka baxdid Boqortooyada Midowday (UK).

Ka waran haddii codsigayga taageerada Qaybta 4-aad aanan ku guuleysan?

Haddii UKBA ay diido codsigaaga taageerada Qaybta 4-aad, waxa aad xaq u leedahay inaad racfaan ama ambiil ka qaadatid diidmada waxana uu Adeegga Wax Kasta Hal Meel (One Stop Service) kaa gargaarid doonaa racfaanka. Waa inaad racfaanka ku qaadatid gudaha wakhti xadkiisu si weyn u yar yahay – sida caadiga ah shan maalmaha shaqada ah gudahood ee warqadda go'aanka UKBA.

Dib ayaad u codsan kartaa haddii xaaladahaagu isbeddelayn ka dib codsigaagii ugu dambeeyay ee aad ku codsatay taageerada Qaybta 4-aad. Waxa kale oo aad awoodi kartaa inaad dib u codsatid haddii aad haysatid marag-kac cusub oo taageeraya codsigaaga magangalyada. Waxay UKBA hubin doontaa inaad dhabtii tahay qof aan waxba haysan waxana ay ku weydiin doontaa sidii ay suurogal kuugu noqotay inaad noolatid ka dib codsigaagii ugu dambeeyay.

Waa maxay taageerada kale ee la heli karo?

Haddii aad leedahay dhibaatooyin xagga jidhka ama waxbarashada ah, dhibaatooyin maqal ama arag, dhibaatooyin xagga caafimaadka maskaxda ah ama caafimaad xun oo mudo dheer soo jiray, waa inaad markaa ogaatid haddii aad gargaar ka heli kartid qaybta adeegyada bulshada (social services) ee maamulka degmadaada. Waa in adiga ama qof kale oo adiga wakiil kaa ahi weydiyo qaybta adeegyada bulshada ee maamulka degmada in lagu sameeyo qiimeyn baahi daryeel beeleed.

Haddii aad maraysid dhamaadka habkii magangalyadaada oo aanay kuu hadhin xuquuq racfaan oo kale, laguuna diiday taageerada Qaybta 4-aad, isla markaana aanad haysan si kale oo aad naftaada ku taageertid, waxa aad gargaar ka raadsan kartaa hay'adaha samofalka. Marmarka qaarkood, hay'adaha beesha ee degmada sida kooxaha qaxooti ama kooxaha diinta ayaa ku siin kara cunto diiran, cunto qaadasho ah, alaabta nadaafadda ama dhar.

Si aad u ogaatid kuwa ay yihiin hay'adaha samofalka ee sidaa kuu caawin kara, waxa aad weydiin kartaa Adeegga Wax Kasta Hal Meel (One Stop Service), xafiiska Laanqayrta Cas (Red Cross) ee degmadaada, Xafiiska La-talinta Muwaadiniinta ee degmada ama xarun la-talin degmo. Ama laybareeriga dadweynaha ayaad weydiin kartaa faahfaahinta sida loola xidhiidho. Waxa dhici karta in maamulka degmadaadu uu sameeyay adeeg caawiya magangalyo-doonka sidaasoo kale sabool ku noqday.

Adeegyada Wax Kasta Hal Meel (One Stop Services)

Hay'adaha samofalka qaxootiga sida Adeegga Qaxootiga ee Waqooyiga Iglan (North of England Refugee Service), Hawlgalka Qaxootiga (Refugee Action), Golaha Qaxootiga (Refugee Council), Golaha Qaxootiga ee Iskootishka (Scottish Refugee Council) iyo Golaha Qaxootiga ee Welshka (Welsh Refugee Council) ayaa ah hay'adaha waaweyn ee magangalyo-doonka iyo qaxootiga siiya gargaar iyo talo. Hay'adahaasi waxay bixiyaan war iyo talo ku saabsan hoyga, taageerada raashinka, magangalyada, caafimaadka iyo arrimo kale iyada oo la adeegsanayo Adeegyadooda Wax Kasta Hal Meel (One Stop Services) ee ku yaala gobolada UK ee kala duwan.

Waxa aad faahfaahinta sida loola xidhiidho Adeegga Wax Kasta Hal Meel (One Stop Service) ee degmadaada ka helaysaa bartan:

<http://languages.refugeecouncil.org.uk/english/services.htm>

Waa lagu xidhay waxaan loo baahanyahay lacagta xabsiga laga bixiyo

Hadii aad ku xidhantahay laanta socdaalka ood u baahantahay hooyga ujeedada codsiga lacagta xabsi waxaad ka codsan kartaa qaybta taageerada 4-aad adoo isticmaalaya Foomka Codsiga Lacagta xabsi ee Qaybta 4-aad (Section 4 Bail Application Form) kaasoo laga helayo websaydka UKBA ee:

http://www.ukba.homeoffice.gov.uk/sitecontent/applicationforms/asylum/section_4_bail_application_1.pdf

Hadii aad xidhantahay, waxaa muhiim kuu ah inaad muujisid in aad tahay baahane ama aad buuxinayasad wax ka mid ah shanta sharuudood ee loogu qalmo ee xaga sare ku yaal si loogu qalmo taageerada qaybta 4-aad.

Waxaad ka heli kartaa warbixin badan oo ku saabsan sida loo codsado lacagta xabsiga ee qof ka mid ah kooxda booqdayaasha maxbuuska.

http://www.aviddetention.org.uk/index.php?option=com_content&view=category&id=5&Itemid=5

ama ka imaanaya Lacagta xabsiga ee Maxaabiista Laanta Socdaalka (Bail for Immigration Detainees) ee: www.bid.org

Asylum Support Partnership consists of:

North of England Refugee Service, charity number: 1091200 www.refugee.org.uk

Refugee Action, charity number: 283660 www.refugee-action.org.uk

Refugee Council, charity number: 1014576 www.refugeecouncil.org.uk

Scottish Refugee Council, charity number: SC008639 www.scottishrefugeecouncil.org.uk

Welsh Refugee Council, charity number: 1102449 www.welshrefugeecouncil.org